


Luqada ilmahaaga

Waxay carruurta gundhiga/seeska luqadooda taagaan/u dhigaan saddexdooda sano ee ugu horreeya. Waxay inay luqadooda horumariyaan bilaabaan ka hor intaanay hadlin. Adiga ayaa sidaas darteed waalid ahaan door naadir ah ku leh.

Ilmahaaga la hadal, la hees, la qosol oo wax la akhri! Isticmaal afkaaga hooyo. Ilme carruur ah ayaa isla hal mar luqado/afaf badan wada baran kara.



Bokstart

Bilawga buugga (Bokstart) waa dadaal ku wajahan waalidiinta iyo dadka waaweyn ee garab jooga carruurta yaryar (0-3 sano jir ah), iyadoo ay ujeedadu tahay dhiirigelinta horumarinta luqadda.
bokstart.se

Waxay ku bilaabantaa luqada

Waa maxay sababta ay muhiimka ugu tahay inaad dhiirgaliso horumarka luqada ee ilmahu? Madaama oo ay luqadu gundhig u tahay waxbarashada. Iyadoo ay luqadu kor u qaadeyso xiriirka adiga iyo ilmahaaga idinka dhaxeeya.

Luqada ku ciyaar ka hor intaanu ilmahu erayada baran

La hadal adigoo u soo maraaya tusaale ahaan inaad dhawaaq samayso, farta wax ku fiiqdo/ wax u tilmaamto oo aad dhegaysato. Qanjil codka ilmaha, ereyo kaga jawaab, ama adigoo dareen qos-qosol ah wajiga ku muujinaaya.

Ka hadal waxaad sameynaysaan

Ka hadal waxyaalaha aad wadajir u sameysaan, sida in la qubeysto ama aad raashin soo adeegataan. Markaas ayuu ilmahu isla markiiba ahmiyada saarayaa waxaad sharaxeyso oo inuu erayo cusub bartaa u dhibyaraanaysaa.



Ilmaha sii erayo cusub

Ku soo celi waxa uu ilmahu dhahaayo oo dhowr kalmadood ku dar. Haddii ilmuhu dhaho “Eeg guri”, ayaad odhan kartaa “Haa, eeg waa guri weyn oo huruud ah”. Kalmadaha cusub ku isticmaal waxyaalo cusub. Waxaad odhan kartaa: “Hadda waa inaynu wax nadiifino. Nadiifi alaabta ciyaarta! Fiiri, aabo ayaa wax nadiifinaaya. Miyaad iga caawin kartaa wax nadiifinta?”

Wax buunbuuni

Waxa fiican inaad buunbuuniso luqadda jirka iyo gacmaha layskula hadlo, wejiga wax ka muujineyso iyo waxyaalaha aad carabka ku adkeynayso. Markaas ayay u fududaan kartaa ilmaha inuu fahmo. Waxaad gacmaha ku tusi kartaa siday wax u wayn yihiin. Ama ay u eeg yihiin haddii aad qadhqadheyso markay wax qabow yihiin. Waxa fiican inaad carabka ku adkeyso ereyada muhiimka ah iyo kuwa cusub. Tusaale ahaan ”Laanbada ma aragtaa?”

Su’aalo weydii

Isticmaal su’aalaha kala duduwan. Waxaad weydiin kartaa su’aalaha sida “Daaqadu meeday?” Markaas ayuu ilmuhu ka jawaabi karaa isagoo tilmaamaya. Haddii ilmuhu aanu ka jawaabin, ayaad adigu ka jawaabi kartaa – markaas ayaad tusaysaa sida erayada loo isticmaalo.

Dheh “Waxaan is weydiinayaa”

Halkii aad ka weydiin laheyd “Muxuu farasku sameyn doonaa?” ayaad odhan kartaa “Waxaan is weydiinayaa haddii uu farasku gaajoonayo”. Sidaas ayaa loogu dareemayaa inay su’aashu furan tahay, oo aad ilmaha uga dhigeysaa mid wax badan sheega.

Bokstart